**Ogeysiinta Asturnaanta & Ammaanka ee HMIS**

Ogeysiintani waxay wax kaaga sheegaysaa sida degaannada Clackamas, Multnomah, iyo Washington u isticmaalaan shaacana uga qaadaan "macluumaadka gaarka ah ee la ilaaliyo" ama "PPI". Waxay wax kaa sheegaysaa xuquuqdaada iyo waajibaadka naga saaran ilaalinta gaar ahaanshaha PPIaad leedahay. Waxay sidoo kale kuu sheegaysaa sida naloo soo ogeysiiyo haddii aad aaminsan tahay in aanu ku xadgudubnay xuquuqdaada ama mid ka mid ah waajibaadkayada. Waa in aanu raacnaa hadalada ku qoran ogeysiintani ee waqtigan la joogo dhaqan galka ah. Ogeysiintani waxaa la heli doonaa iyada oo ku qoran luqaddo badan waxaanad codsan kartaa nuqul ku qoran luqadda aad aqoonta badan u leedahay.

Sharci ahaan waxaa nalooga baahan yahay in aan ilaalino gaar ahaanshaha PPI aad leedahay. Waxaa dhici karta in aanu isticmaalo ama shaaca ka qaadno macluumaadkaagu si aanu kuu siino adeegyo, iyo si loogu hoggaansamo sharciga iyo waajibaadyada kale. Codsiga aad adeegyo naga codsanayso ee aad na siinayso macluumaad gaar ah, waxaad ku raacsan tahay in aad noo oggolaato ururinta macluumaadka iyo in aan isticmaalno ama shaacino iyaga sida lagu qeexay ogeysiintani ama haddii kale ama sharci ahaan la iskaga baahan yahay.

Ogeysiintani ma aha heshiis sharci. Waxaanu leenahay xaquuq aan mar kasta ku beddeli karno ogeysiintani. Haddii ogeysiintani la beddelo, nuqulka ogeysiinta dib loo eegay ayaa la heli doonaa marka la codsado oo la soo gelin doonaa website-kayaga. Wax ka beddelka lagu sameeyo ogeysiintani waxay noqon doontaa mid dhaqan gal ah iyada oo la tixraacayo dhammaan macluumaadka la habeeyay ka hor wax ka beddelka, iyada oo haddii kale la tilmaamo maahane.

Waxaad wakhti kasta codsan kartaa nuqulka ogeysiintayada. Wixii macluumaad dheeraad ee ku saabsan ogeysiinta dhacdooyinkayaga asturan, ama nuqulada dheeraadka ah ee ogeysiintani, fadlan nala soo xiriir adiga oo isticmaalaya macluumaadka lagu qoray xaga dambe ee ogeysiintan.

**********

I. <u>NIDAAMKA MACLUUMAAD EE MAAMULKA HOY LA'AANTA</u>.

Nidaamka Macluumaad ee Maamulka Hoy la'aanta (<u>HMIS</u>) waxaa loo dejiyay si loo buuxiyo shuruudaha xog ururinta ee ay sameeyeen Congress-ka Maraykanka iyo Waaxda Guryaha iyo Horumarinta Magaalada (<u>HUD</u>). Congress-ka ayaa ansixiyay shuruudahani si loo helo tiro sax ah oo dheeraad ah ee dadka guri la'aanta ah iyo si loo ogaado baahida loo qabo iyo isticmaalka adeegyada kala duwan ee loogu talagalay dadkani iyo qoysaskani.

Iyada oo ay dheer tahay ururinta macluumaadka la siinayo HUD iyo si loogu hoggaansamo sharciga, waxaanu u isticmaalnaa HMIS bixinta iyo isku duwida adeegyada aad hesho iyo fulinta hawlaha maamulka ee la xiriira adeegyadaasi, sida bixinta lacagta ama dib u bixinta lacagta loogu talagalay adeegyada. Waxaan sidoo kale soo saarnaa macluumaad xog ahaaneed oo ku saabsan kuwa isticmaala adeegyadayada iyo ku soo sheegista macluumaadkani ee siyaabo kala duwan. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida degaannada Clackamas, Multnomah, iyo Washington u isticmaalaan macluumaadka ku jira HMIS ayaa lagu bixiyay ogeysiintani, hoosta ku qoran.

II. <u>ISTICMAALKA IYO WADAAGIDA MACLUUMAADKA KU JIRA HMIS</u>.

Dhammaan macluumaadka aan soo ururino ee ku saabsan dadka helaya adeegyada ayaa lagaga hadlay ogeysiintani. Guud ahaan, macluumaadka la soo ururiyay ee ku saabsan adiga, sida magacaaga iyo adeegyada iyo isku gudbinta adeegyada aad hesho, waxaa la gelin doonaa nidaamkayaga HMIS – Software Adeegyada Bulshada (CSS) – oo kaliya loo isticmaalo:

• ujeedooyinka dhanka maamulka iyo hawlaha si loo wanaajiyo, bixiyo oo la iskugu duwo adeegyada lagu siin karo;
• shaqooyinka la xiriira bixinta lacagta ama dib u bixinta lacagta loogu talagalay adeegyada;
• la socodka, falanqeynta, iyo qiimeynta waxtarka barnaamijka; iyo
• diyaarinta isku darka guud ee warbixinada iyo macluumaadka xog ahaaneed.

Adeeg bixiyayaal badan ayaa isticmaala CSS si ay ugu keydiyaan diiwaannada kiiskooda kambiyuutarka oo diiwaannadaasi u siiyaan hay'adaha kale ee HMIS ee ka qayb qaadanaya. Macluumaadka aan isku soo ururino ee aanu shaacino waxaa ka mid ah PPI -- oo ay ka mid yihiin balse aanan ku koobnayn magacaaga, cinwaankaaga, lambarkaaga social security-ga ama lambar kale oo qofka lagu aqoonsanayo ama astaanta, lambarka telefoonka, ama cinwaanka email-ka – iyo macluumaad sharraxaya dabeecada xaaladaada iyo adeegyada iyo is gudbinta aad ka hesho anaga iyo/ama hay'adaha adeeg bixiya ah ee ka qayb qaadanaya. Ku dhawaad dhammaan hay'adaha isticmaalaya HMIS waxay xogtooda u shaaciyaan hay'ada kale ee ka qayb qaadanaya, inkasta oo xogta la wadaagay ay kala duwanaan karto marka hay'ad loo eego hay'ad kale oo macluumaad loo eego macluumaad kale. Macluumaadka waxaa dhici karta in la geliyo ama la shaaciyo adiga oo aan muujin oggolaansho sida sharcigu ogol yahay.

Intaasi waxaa dheer, hay'ada taageerta isticmaalkayaga CSS, WellSky, waxaa dhici karta in ay gasho, isticmaasho, oo shaaciso PPI si loo bixiyo taageero, oo ay ku jiraan isku eegida macmiilka iyo sheegashooyinka wadaagista xogta, iyo si loo fududeeyo biilashada, lacag bixinta, ama sheegashooyinka-la xiriira hawlaha bixiye caymis oo kasta, wax bixiyaha, ama dhinac saddexaad oo la mid ah ee la siiyo degaannada Clackamas, Multnomah, iyo Washington. WellSky sidoo kale waxaa dhici karta in ay ku darto PPI xogta dadka kale ee la keydiyay ee ku jirta HMIS ee loogu talagalay abuurista iyo ilaalinta diiwaannada macmiilka.

Macluumaadka macmiilka ugu yar qaarkood ayaa la wadaagaa iyada oo la isticmaalayo HMIS si la iskaga ilaaliyo abuurista diiwaanada macmiilka oo isku mid ah. Dadka la oggol yahay ee jooga hay'adaha bulshada ee ka qayb qaadanaya ayaa awoodi doona in ay arkaan qaybaha dhanka macluumaadka ee soo socda ee dhammaan diiwaanada macmiilka:

- Magaca Hore & Dambe
- Magaca Tayada Xogta
- Magaca la isku yaqaano
- Lambarka Social Security-ga (oo looga baahan yahay adeegyo gaar ah)
- Tayada Xogta SSN
- Jinsiga
- Xaalada Qofka soo halgama
- Da'da

Degaannada Clackamas, Multnomah, iyo Washington ayaa u isticmaali doona oo u shaacin doona macluumaadkaaga gaarka ah ujeedooyinka halkan lagu qeexay iyo isticmaalka iyo shaacinta kale ee ku habboon:

1. Si loo qorsheeyo, bixiyo oo la iskugu duwo adeegyada guud ahaan hay'ado badan.
2. Si aad u hesho barnaamijyada kale ee ay dhici karto in ay ku caawiyaan.
3. Shaqooyinka la xiriira bixinta lacagta ama dib u bixinta lacagta loogu talagalay adeegyada.
4. Si loo fuliyo hawlaha maamulka oo ay ku jiraan balse aanan ku koobnayn sharciga, hanti dhawrka, shaqaalaha, qorsheynta, falanqeynta, warbixinta, kormeerka ama shaqooyinka maamulka.
5. Cilmi-baaris dhanka heshiiska ah halkaasi shuruudaha la buuxiyo.
6. Halka shaacinta la oggol yahay sharci ahaan iyada oo shaacintuna waafaqsan tahay kuna kooban tahay shuruudaha sharciga. Tusaalooyinka ay tani dhici karto waa inta lagu jiro xaalada caafimaad ee degdega ah, in la soo sheego dembiga ka dhanka ah shaqaalahayaga ama dembi ka dhacay dhismahayaga, ama in laga hortaggo dhibaatooyinka halista u ah caafimaadka ama ammaanka, oo uu ku jiro isku dayga qofka ee in uu waxyeello u geysto naftiisa.
7. Si loogu hoggaansamo waajibaadyada wax soo sheegida sharciga ah.
8. Iyada oo la xiriirta amar maxkamadeed, waaranka 'warrant', amarka imaanshaha maxkamadda 'subpoena' ama dacwad maxkamadeed oo kale halkaasi oo in wax la shaaciyo loo baahan yahay.
9. Marka aad haddii kale oggolaato ama bixiso amarka 'authorize' wax shaacinta.

Marka aanu diyaarino warbixinnada iyo macluumaadka xog ahaaneed ama macluumaad ka socda HMIS siino dhinacyada kale oo loogu talagalay ujeedooyin cilmi-baariseed ama qiimeyn, waxaan macluumaadka ka dhignaa mid aan la aqoonsan karin "de-identify" ka hor inta aynaan shaacin iyada. Ka dhigista macluumaadka ee mid aan la aqoonsan karin "de-identifying" wuxuu ka dhigan yahay in aanu PPI aad leedahay ka saarno si macluumaadka la shaaciyay aan loo istimaali karin in lagugu aqoonsado.

Ilaalinta asturnaanta iyo badbaadada dadka isticmaalaya adeegyadeenu aad ayay muhiim noogu yihiin. Macluumaadka la soo ururiyo ee ku saabsan adigu waa mid shakhsi oo gaar ah. Waxaan macluumaadka ururinaa oo kaliya marka ay habboon tahay in la bixiyo adeegyo, la maareeyo ururkayaga, ama sida sharcigu dhigayo.

III. <u>XUQUUQDA QARSOODINIMO</u>.

Hababka asturnaanta iyo qarsoodinimada ee lagu qeexay ogeysiintani ayaa lagu maamulaa isticmaalkayaga macluumaadka ku jira HMIS waxaana ansixiyay guddigeena Continuum of Care, dad mas'uul ah oo go'aan qaadanaya oo loogu talagalay nidaamka adeegyada guri la'aanta. Hababkani waxay raacaan dhammaan xeerarka qarsoodinimada ee HUD oo khuseeya degaannada Clackamas, Multnomah, iyo Washington, oo ay ka mid yihiin balse aanan ku koobnayn kuwa bixinaya barnaamijyo dhaqaale loogu talagalay adeegyada guri la'aanta ka hela HUD ama dhinac saddexaad oo kale. Xeerarka asturnaanta iyo ammaanka oo gooni ah ayaa khuseeya macluumaadkaaga caafimaad ee sharcigu dhowrayo ee ku xiran Xeerka Federaalka ee Haynta Macluumaadka Caafimaad iyo Masuuliyadda (HIPAA).

Qof iyo hay'ad kasta oo loo oggolaado in ay akhriyaan ama macluumaad geliyaan xogta waxaa loo tababaray siyaasadaha qarsoodinamada macmiilka wuxuuna saxiixay heshiis si loo ilaaliyo amniga iyo

qarsoodinimada macluumaadka. Qof ama hay'ad kasta oo lagu helo in ay ku xadgudbaan heshiiskooda waxaa dhici karta in xuquuqdooda dhanka gelitaanka la joojiyo oo mutaystaan ciqaabo dheeraad ah.

IV. MACLUUMAADKA XUQUUQAHAAGA.

Qofka adeegyo ka helaya degaannada Clackamas, Multnomah, iyo/ama Washington ahaan, waxaad leedahay xuquuqaha soo socda:

1. *Gelitaanka diiwaankaaga*. Waxaad xaq u leedahay in aad dib u fiiriso oo nuqul ka sameyso diiwaankaaga HMIS. Codsigaaga, waxaan kaa caawin doonaa dib u eegida diiwaanka shan maalmo shaqo gudahood. Haddii aanu diidno codsigaaga helitaanka, waxaa lagu siin doonaa dokumenti qoraal ah ee ku saabsan codsigaaga iyo sababta diidmada. Nuqulka dokumentigaasi ayaa sidoo kale lagu soo dari doonaa diiwaanka adeegyadaada.
2. *Sixitaanka diiwaankaaga*. Waxaad xaq u leedahay in aad codsato in diiwaankaaga la saxo si macluumaadku u noqdo mid cusub oo sax ah, isla markaana la xaqiijiyo cadaalada isticmaalkiisa. Haddii aanu diidno codsigaaga wax sixida, waxaa lagu siin doonaa dokumenti qoraal ah ee ku saabsan codsigaaga iyo sababta diidmada. Nuqulka dokumentigaasi ayaa sidoo kale lagu soo dari doonaa diiwaanka adeegyadaada.
3. *Diidmada*. Guud ahaan, adeegyada laguu diidi maayo haddii aad doorato in aadan dadka la wadaagin macluumaad. Duruufaha qaarkood, awooda lagu bixinayo adeegyada qaarkood waxay ku xiran tahay yeelashada PPI qaarkood, sidaa darteed, waxaa dhici karta in aanu diidno ama dib u dhigno in aan ku siino adeegyo haddii aadan shaacin macluumaadka looga baahan yahay adeegyadaasi.
4. *Xaqa Hay'adu u Leedahay Diidmada Kormeerka Diiwaanka Shakhsi*. Degaannada Clackamas, Multnomah, iyo Washington iyo adeeg bixiyayaashoodu waxa dhici karta in ay sababaha soo socda kuugu diidaan xuquuqda aad u leedahay in aad baarto ama nuqul ka sameyso PPI aad leedahay:
    a. macluumaadka la iskugu soo ururiyey filasho macquul ah oo dacwadeed ama dacwadaha la midka ah;
    b. macluumaadka ku saaban shakhsi kale oo aan ka ahayn shaqaalahayaga oo la shaacin doono;
    c. macluumaadka oo lagu helay ballan qaad qarsoodinimo oo aan ka ahayn ballan qaad ka socda adeeg bixiyahani iyada oo shaacintu ay muujin doonto halka ay ka yimaadeen macluumaadku; ama
    d. macluumaad, shaacinta taasi oo ay si macquul ah u badan tahay in ay khatar geliso nolosha ama badbaadada jir ahaaneed ee shakhsi kasta.
5. *Wa dhibaateynta*. Waxaanu leenahay xaquuqda aan ku diidi karno codsiyada soo noqnoqda ama dhibaateynta ee helitaanka ama sixitaanka diiwaankaaga HMIS.
6. *Tabashada*. Waxaad xaq u leedahay in lagu maqlo haddii aad dareemayso in xuquuqdaadii qarsoodinimo lagu xadgudbay, haddii laguu diiday gelitaanka diiwaannadaada HMIS, ama si xaqdarro ah laguu geliyay halis shakhsi, ama waxyeello lagu gaarsiiyay. Degaannada Clackamas, Multnomah, iyo Washington ayaa dejiyay nidaamka wax tabashada oo rasmi ah oo loogu talagalay in aad isticmaasho durufahaasi oo kale. Si aad u gudbiso cabasho ama tabasho, nala soo xiriir adiga oo isticmaalaya macluumaadka ku yaala dhammaadka ogeysiintani:

V. SIDA MACLUUMAADKAAGA LOOGA DHIGI DOONO MID SUGAN.

Ilaalinta badbaadada iyo asturnaanta dadka helaya adeegyada iyo qarsoodinimada diiwaannadoodu waa waxay noo leeyihiin muhiimada ugu weyn. Iyada oo la adeegsanayo tababar, siyaasado, nidaamyo iyo software, waxaanu qaadnayn tallaabooyinka soo socda si aanu u xaqiijino in PPI aad leedahay ammaan yahay oo sugan yahay:

1. Nidaamyada macluumaadka ee aanu isticmaalno, waxaanu isticmaalnay oo sii wadi doonaa tallaabooyinka farsamo iyo urur oo ku habboon si looga ilaaliyo PPI gelitaan aan la oggolayn, burburinta aan lagu tala gelin ama aan sharciga ahayn, luminta, wax ka beddelka, iyo wax shaacinta aan la oggolayn.
2. Kaliya dadka tababaran oo la oggol yahay ayaa geli doona ama arki doona PPI aad leedahay.
3. Magacaaga iyo PPI kale kuma jiri doonaan warbixinnada HMIS ee la siiyo hay'adaha aan dhaqaale-bixiyaha ahayn' non-funder' ee degaanka, gobolka ama qaranka ee aanan geli karin HMIS.
4. Shaqaaluhu waxay helaan tababar ah dhanka ilaalinta asturnaanta oo oggol yihiin in ay raacaan heerarka qarsoodinimada oo adag ka hor inta aysan isticmaalin nidaamka.
5. Iyada oo ay dheer tahay WellSky, Maamulayaasha Nidaamka ee aan shaqaaleysiino waxay taageeraan hawlgalka xogta. Maamulka xogta waxaa lagu maamulaa heshiisyo xaddidaya isticmaalka PPI ee ujeedooyinka lagu tilmaamay ogeysiintani. Heshiisyadani waxay si dheeraad ah u xaqiijiyaan qarsoodinimada PPI aad leedahay.

VI. <u>FAA'IIDOOYINKA URURINTA MACLUUMAADKA IYO WADAAGISTA</u>.

Macluumaadka aad bixiso ee la geliyo HMIS waxay door muhiim ah ka qaadan doonaan awoodayada iyo awooda hay'adaha kale ee in ay sii wadaan bixinta adeegyada aad adiga iyo kuwa kale ee ka tirsan bulshadu codsanaysaan. Shaacinta macluumaadka ee HMIS dhexdeeda ee la siinayo hay'adaha kale ee ka qayb qaadanaya waxay awood u siisaa isku duwida adeegyada ee guud ahaan hay'adahaasi wuxuuna kaa caawiyaa helitaan dhakhso ah ee adeegyada.

Ururinta xogta iyo wadaagistu waxay sidoo kale gacan ka geysataa fahamkeena wada jira ee tirada dadka u baahan adeegyada ee ka tirsan bulshada iyo noocyada adeegyo ee ay u baahan yihiin kooxo dad ah oo kale duwan. Tani beddelkeeda waxay noo saamaxdaa in aanu:

1. Si fiican u muujino baahida loo qabo adeegyada iyo nooca caawimaad ee gaarka ah ee looga baahan yahay degaankeena.
2. Adeegyo badan ka dhigno kuwo la helo karo si loo daboolo baahiyaha bulshada.
3. Qorsheyno, wanaajino, oo bixino adeegyo tayo leh.
4. Hayno tirokoobka la iskaga baahan yahay ee dhaqaale-bixiyayaasha gobolka iyo federaalka, sida HUD.

VII. <u>U HOGGAANSANAANTA SHARCIYADA KALE</u>.

Degaannada Clackamas, Multnomah, iyo Washington waxay u hoggaansan yihiin dhammaan sharciyada kale ee federaalka, gobolka iyo degaanka ee ku saabsan xuquuqda gaarka ah. La tasho qareen haddii aad hayso su'aalo ku saabsan xuquuqahani.

VIII. <u>WAX KA BEDDELKA OGEYSIINTA ASTURNAANTA</u>.

Siyaadaha lagaga hadlay Ogeysiintani Asturnaanta iyo Ammaanka, waxaa dhici karta in wax laga beddeli karo muddo marka la joogo iyada oo wax ka beddelkaasina uu saameyn doono macluumaadka la helay ka hor taariikhda isbeddelka.    Dhammaan wax ka beddelka lagu sameeyo Ogeysiinta Asturnaanta iyo Ammaanka waa in uu waafaqsan yahay shuruudaha heerarka federaalka ee ilaaliya asturnaanta macaamiisha ee haga hirgelinta iyo hawlgalka HMIS.

IX. WEBSITE-KA.

Waxaanu nuqulka Ogeysiintani Asturnaanta iyo Ammaanka ku haynaa website-kayaga: [URLs]

X. MACLUUMAADKA MEESHA LA ISKALA SOO XIRIIRAYO.
Isticmaal macluumaadka la iskala soo xiriirayo ee hoosta ku qoran si aad u weydiiso su'aalo ku saabsan Ogeysiintani, codso macluumaad dheeraad ah, ama gudbi cabasho.

[Clackamas contact information]

[Multnomah contact information]

[Washington contact information]

~

*Dhammaadka heerka Ogeysiinta Asturnaanta & Ammaanka ee HMIS.*
*Macluumaadka soo haray ee ku jira dokumentigani wuxuu khuseeyaa Comp Site oo kaliya, nooca HMIS ee ay sida gaarka ah u isticmaalaan bixiyayaasha adeegyada dhibbanaha.*

~

**Xogta La isbarbardhigi karo ee Ogeysiintani Asturnaanta & Ammaanka ee HMIS**
*Noocani waa in ay isticmaalaan oo kaliya bixiyayaasha adeegyada dhibbanaha.*

Ogeysiintani waxay wax kaaga sheegaysaa sida degaannada Clackamas, Multnomah, iyo Washington u isticmaalaan shaacana uga qaadaan "macluumaadka gaarka ah ee la ilaaliyo" ama "PPI". Waxay wax kaa sheegaysaa xuquuqdaada iyo waajibaadka naga saaran ilaalinta gaar ahaanshaha PPI aad leedahay.

Waxay sidoo kale kuu sheegaysaa sida naloo soo ogeysiiyo haddii aad aaminsan tahay in aanu ku xadgudubnay mid ka mid ah xuquuqdaada ama mid ka mid ah waajibaadkayada. Waa in aanu raacnaa hadalada ku qoran ogeysiintani ee waqtigan la joogo dhaqan galka ah. Ogeysiintani waxaa la heli doonaa iyada oo ku qoran luqaddo badan waxaanad codsan kartaa nuqul ku qoran luqadda aad aqoonta badan u leedahay.

Sharci ahaan waxaa nalooga baahan yahay in aan ilaalino gaar ahaanshaha PPI aad leedahay. Waxaa dhici karta in aanu isticmaalo ama shaaca ka qaadno macluumaadkaagu si aanu kuu siino adeegyo, iyo si loogu hoggaansamo sharciga iyo waajibaadyada kale. Codsiga aad adeegyo naga codsanayso ee aad na siinayso macluumaad gaar ah, waxaad ku raacsan tahay in aad noo oggolaato ururinta macluumaadka iyo in aan isticmaalno ama shaacino iyaga sida lagu qeexay ogeysiintani ama haddii kale ama sharci ahaan la iskaga baahan yahay.

Ogeysiintani ma aha heshiis sharci. Waxaanu leenahay xaquuq aan mar kasta ku beddeli karno ogeysiintani. Haddii ogeysiintani la beddelo, nuqulka ogeysiinta dib loo eegay ayaa la heli doonaa marka la codsado oo la soo gelin doonaa website-kayaga. Wax ka beddelka lagu sameeyo ogeysiintani waxay noqon doontaa mid dhaqan gal ah iyada oo la tixraacayo dhammaan macluumaadka la habeeyay ka hor wax ka beddelka, iyada oo haddii kale la tilmaamo maahane.

Waxaad wakhti kasta codsan kartaa nuqulka ogeysiintayada. Wixii macluumaad dheeraad ee ku saabsan ogeysiinta dhacdooyinkayaga asturan, ama nuqulada dheeraadka ah ee ogeysiintani, fadlan nala soo xiriir adiga oo isticmaalaya macluumaadka lagu qoray xaga dambe ee ogeysiintan.

Ogeysiintani waxay khuseysaa oo kaliya macluumaadka la geliyo Xogta La isbarbardhigi karo ee HMIS. Adeeg bixiyahani aad la shaqeynayso wuxuu leeyahay siyaasado dheeraad ah oo ilaalinayo macluumaadkaaga.

**********

I. <u>NIDAAMKA MACLUUMAAD EE MAAMULKA HOY LA’AANTA / XOGTA LA ISBARBARDHIGI KARO</u>

Nidaamka Macluumaad ee Maamulka Hoy la’aanta (HMIS) waxaa loo dejiyay si loo buuxiyo shuruudaha xog ururinta ee ay sameeyeen Congress-ka Maraykanka iyo Waaxda Guryaha iyo Horumarinta Magaalada (HUD). Congress-ka ayaa ansixiyay shuruudahani si loo helo tiro sax ah oo dheeraad ah ee dadka guri la’aanta ah iyo si loo ogaado baahida loo qabo iyo isticmaalka adeegyada kala duwan ee loogu talagalay dadkani iyo qoysaskani.

Bixiyayaasha Adeega Dhibbanuhu (VSP-yada) xogta ma gelin karaan HMIS waana inay isticmaalaan Xogta La Isbarbardhigi karo oo gooni ah. Degaannada Clackamas, Multnomah iyo Washington waxay Software-ka Adeegyada Bulshada (CSS) ee Wellsky u isticmaalaan Xogta La Isbarbardhigi karo ahaan ee degaankeena. VSP-yadu ma wadaagaan xogta ka baxsan hay’adooda. Iyada oo ay dheer tahay ururinta xogta guud ee la siinayo HUD iyo si loogu hoggaansamo sharciga, waxaanu u isticmaalnaa CSS bixinta iyo isku duwida adeegyada aad hesho iyo fulinta hawlaha maamulka ee la xiriira adeegyadaasi, sida bixinta lacagta ama dib u bixinta lacagta loogu talagalay adeegyada. Waxaan sidoo kale soo saarnaa isku darka macluumaad xog ahaaneed oo ku saabsan kuwa isticmaala adeegyadayada iyo ku soo sheegista macluumaadkani ee siyaabo kala duwan. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku

saabsan sida degaannada Clackamas, Multnomah, iyo Washington u isticmaalaan macluumaadka ku jira CSS ayaa lagu bixiyay ogeysiintani, hoosta ku qoran.

II. ISTICMAALKA IYO WADAAGIDA MACLUUMAADKA KU JIRA CSS.

Macluumaadka la soo ururiyay ee ku saabsan adiga, sida adeegyada iyo isku gudbinta adeegyada aad hesho, waxaa la gelin doonaa nidaamkayaga CSS oo kaliya loo isticmaalo:

- ujeedooyinka dhanka maamulka iyo hawlaha si loo wanaajiyo, bixiyo oo la iskugu duwo adeegyada lagu siin karo;
- shaqooyinka la xiriira bixinta lacagta ama dib u bixinta lacagta loogu talagalay adeegyada;
- la socodka, falanqeynta, iyo qiimeynta waxtarka barnaamijka; iyo
- diyaarinta isku darka guud ee warbixinada iyo macluumaadka xog ahaaneed.

Macluumaadka aad bixiso waxaa dhici karta in la geliyo CSS adiga oo aan muujin oggolaansho sida sharcigu ogol yahay. Si kastaba ha ahaatee, magacaaga, taariikhdaada dhalasho, cinwaankaaga, macluumaadka lagaala soo xiriirayo iyo lambarkaaga social security-ga marnaba la gelin maayo CSS. Macluumaadka aad siiso barnaamijkani midkoodna ma geli karaan hay'adaha kale.

Degaannada Clackamas, Multnomah, iyo Washington ayaa u isticmaali doona macluumaadkaaga gaarka ah ujeedooyinka halkan lagu qeexay iyo isticmaalka kale oo ku habboon:

1. Si aad u hesho barnaamijyada kale ee ay dhici karto in ay ku caawiyaan.
2. Shaqooyinka la xiriira bixinta lacagta ama dib u bixinta lacagta loogu talagalay adeegyada.
3. Si loo fuliyo hawlaha maamulka oo ay ku jiraan balse aanan ku koobnayn sharciga, hanti dhawrka, shaqaalaha, qorsheynta, falanqeynta, warbixinta, kormeerka ama shaqooyinka maamulka.
4. Halka shaacinta la oggol yahay sharci ahaan iyada oo shaacintuna waafaqsan tahay kuna kooban tahay shuruudaha sharciga. Tusaalooyinka ay tani dhici karto waa inta lagu jiro xaalada caafimaad ee degdega ah, in la soo sheego dembiga ka dhanka ah shaqaalahayaga ama dembi ka dhacay dhismahayaga, ama in laga hortaggo dhibaatooyinka halista u ah caafimaadka ama ammaanka, oo uu ku jiro isku dayga qofka ee in uu waxyeello u geysto naftiisa.
5. Si loogu hoggaansamo waajibaadyada wax soo sheegida sharciga ah.
6. Iyada oo la xiriirta amar maxkamadeed, waaranka 'warrant', amarka imaanshaha maxkamadda 'subpoena' ama dacwad maxkamadeed oo kale halkaasi oo in wax la shaaciyo loo baahan yahay.

Ilaalinta asturnaanta iyo badbaadada dadka isticmaalaya adeegyadeenu aad ayay muhiim noogu yihiin. Macluumaadka la soo ururiyo ee ku saabsan adigu waa mid shakhsi oo gaar ah. Waxaan macluumaadka ururinaa oo kaliya marka ay habboon tahay in la bixiyo adeegyo, la maareeyo ururkayaga, ama sida sharcigu dhigayo.

III. XUQUUQDA QARSOODINIMO

Dhaqamada asturnaanta iyo qarsoodinimada ee lagu qeexay ogeysiintani ayaa lagu maamulaa isticmaalkayaga macluumaadka ku jira CSS waxaana ansixiyay guddigeena Continuum of Care, dad mas'uul ah oo go'aan qaadanaya oo loogu talagalay nidaamka adeegyada guri la'aanta. Hababkani waxay raacaan dhammaan xeerarka qarsoodinimada ee khuseeya degaannada Clackamas, Multnomah, iyo Washington, oo ay ka mid yihiin balse aanan ku koobnayn kuwa bixinaya barnaamijyo dhaqaale

loogu talagalay adeegyada guri la'aanta ka hela HUD ama dhinac saddexaad oo kale. Xeerarka asturnaanta iyo ammaanka oo gooni ah ayaa khuseeya macluumaadkaaga caafimaad ee sharcigu dhowrayo ee ku xiran Xeerka Federaalka ee Haynta Macluumaadka Caafimaad iyo Masuuliyadda (HIPAA).

Qof iyo hay'ad kasta oo loo oggolaado in ay akhriyaan ama macluumaad geliyaan CSS waxaa loo tababaray siyaasadaha qarsoodinamada macmiilka wuxuuna saxiixay heshiis si loo ilaaliyo amniga iyo qarsoodinimada macluumaadka Qof ama hay'ad kasta oo lagu helo in ay ku xadgudbaan heshiiskooda waxaa dhici karta in xuquuqdooda dhanka gelitaanka la joojiyo oo mutaystaan ciqaabo dheeraad ah.

IV. MACLUUMAADKA XUQUUQAHAAGA.

Qofka adeegyo ka helaya degaannada Clackamas, Multnomah, iyo/ama Washington ahaan, waxaad leedahay xuquuqaha soo socda:

1. *Gelitaanka diiwaankaaga*. Waxaad xaq u leedahay in aad dib u fiiriso oo nuqul ka sameyso diiwaankaaga CSS. Codsigaaga, waxaan kaa caawin doonaa dib u eegida diiwaanka shan maalmo shaqo gudahood. Haddii aanu diidno codsigaaga helitaanka, waxaa lagu siin doonaa dokumenti qoraal ah ee ku saabsan codsigaaga iyo sababta diidmada. Nuqulka dokumentigaasi ayaa sidoo kale lagu soo dari doonaa diiwaanka adeegyadaada.
2. *Sixitaanka diiwaankaaga*. Waxaad xaq u leedahay in aad codsato in diiwaankaaga la saxo si macluumaadku u noqdo mid cusub oo sax ah, isla markaana la xaqiijiyo cadaalada isticmaalkiisa. Haddii aanu diidno codsigaaga wax sixida, waxaa lagu siin doonaa dokumenti qoraal ah ee ku saabsan codsigaaga iyo sababta diidmada. Nuqulka dokumentigaasi ayaa sidoo kale lagu soo dari doonaa diiwaanka adeegyadaada.
3. *Diidmada*. Guud ahaan, adeegyada laguu diidi maayo haddii aad doorato in aadan dadka la wadaagin macluumaad. Duruufaha qaarkood, awooda lagu bixinayo adeegyada qaarkood waxay ku xiran tahay yeelashada PPI qaarkood, sidaa darteed, waxaa dhici karta in aanu diidno ama dib u dhigno in aan ku siino adeegyo haddii aadan shaacin macluumaadka looga baahan yahay adeegyadaasi.
4. *Xaqa Hay'adu u Leedahay Diidmada Kormeerka Diiwaanka Shakhsi*. Degaannada Clackamas, Multnomah, iyoWashington iyo adeeg bixiyayaashoodu waxa dhici karta in ay sababaha soo socda kuugu diidaan xuquuqda aad u leedahay in aad baarto ama nuqulka PPI aad leedahay:
    a. macluumaadka la iskugu soo ururiyey filasho macquul ah oo dacwadeed ama dacwadaha la midka ah;
    b. macluumaadka ku saaban shakhsi kale oo aan ka ahayn shaqaalahayaga oo la shaacin doono;
    c. macluumaadka oo lagu helay ballan qaad qarsoodinimo oo aan ka ahayn ballan qaad ka socda adeeg bixiyahani iyada oo shaacintu ay muujin doonto halka ay ka yimaadeen macluumaadku; ama
    d. macluumaad, shaacinta taasi oo ay si macquul ah u badan tahay in ay khatar geliso nolosha ama badbaadada jir ahaaneed ee shakhsi kasta.
5. *Wa dhibaateynta*. Waxaanu leenahay xaquuqda aan ku diidi karno codsiyada soo noqnoqda ama dhibaateynta ee helitaanka ama sixitaanka diiwaankaaga CSS.

6. *Tabashada*. Waxaad xaq u leedahay in lagu maqlo haddii aad dareemayso in xuquuqdaadii qarsoodinimo lagu xadgudbay, haddii laguu diiday gelitaanka diiwaannadaada CSS, ama si xaqdarro ah laguu geliyay halis shakhsi, ama waxyeello lagu gaarsiiyay. Degaannada Clackamas, Multnomah, iyo Washington ayaa dejiyay nidaamka wax tabashada oo rasmi ah oo loogu talagalay in aad isticmaasho durufahaasi oo kale. Si aad u gudbiso cabasho ama tabasho, nala soo xiriir adiga oo isticmaalaya macluumaadka ku yaala dhammaadka ogeysiintani.

V. <u>SIDA MACLUUMAADKAAGA LOOGA DHIGI DOONO MID SUGAN</u>

Ilaalinta badbaadada iyo asturnaanta dadka helaya adeegyada iyo qarsoodinimada diiwaannadoodu waa waxay noo leeyihiin muhiimada ugu weyn. Iyada oo la adeegsanayo tababar, siyaasado, nidaamyo iyo software, waxaanu qaadnayn tallaabooyinka soo socda si aanu u xaqiijino in PPI aad leedahay ammaan yahay oo sugan yahay:

1. Nidaamyada macluumaadka ee aanu isticmaalno, waxaanu isticmaalnay oo sii wadi doonaa tallaabooyinka farsamo iyo urur oo ku habboon si looga ilaaliyo PPI gelitaan aan la oggolayn, burburinta aan lagu tala gelin ama aan sharciga ahayn, luminta, wax ka beddelka, iyo wax shaacinta aan la oggolayn.
2. Kaliya dad tababaran oo la oggol yahay ayaa geli doona ama arki doona macluumaadkaaga ku jira CSS.
3. Magacaaga, taariikhdaada dhalasho, cinwaankaaga, macluumaadka lagaala soo xiriirayo ama lambarkaaga social security-ga lama gelin doono CSS sidaas darteed, kuma jiri doonaan warbixinnada guud ee CSS.
4. Shaqaaluhu waxay helaan tababar ah dhanka ilaalinta asturnaanta oo oggol yihiin in ay raacaan heerarka qarsoodinimada oo adag ka hor inta aysan isticmaalin nidaamka.
5. Iyada oo ay dheer tahay WellSky, Maamulayaasha Nidaamka ee aan shaqaaleysiino waxay taageeraan hawlgalka xogta. Maamulka xogta waxaa lagu maamulaa heshiisyo xaddidaya isticmaalka macluumaadkaaga ee ujeedooyinka lagu tilmaamay ogeysiintani. Heshiisyadani waxay si dheeraad ah u xaqiijiyaan qarsoodinimada macluumaadkaaga.

VI. <u>FAA’IIDOOYINKA URURINTA MACLUUMAADKA</u>

Macluumaadka aad bixiso ee la geliyo CSS waxay door muhiim ah ka qaadan doonaan awoodayada iyo awooda hay’adaha kale ee in ay sii wadaan bixinta adeegyada aad adiga iyo kuwa kale ee ka tirsan bulshadu codsanaysaan. Ururinta xogtu waxay sidoo kale gacan ka geysataa wanaajinta fahamkeena wada jira ee tirada dadka u baahan adeegyada ee ka tirsan bulshada iyo noocyada adeegyo ee ay u baahan yihiin kooxo dad ah oo kale duwan. Tani beddelkeeda waxay noo saamaxdaa in aanu:

1. Si fiican u muujino baahida loo qabo adeegyada iyo nooca caawimaad ee gaarka ah ee looga baahan yahay degaankeena.
2. Adeegyo badan ka dhigno kuwo la helo karo si loo daboolo baahiyaha bulshada.
3. Qorsheyno, wanaajino, oo bixino adeegyo tayo leh.
4. Hayno tirokoobka la iskaga baahan yahay ee dhaqaale-bixiyayaasha gobolka iyo federaalka.

VII. <u>U HOGGAANSANAANTA SHARCIYADA KALE</u>

Degaannada Clackamas, Multnomah, iyo Washington waxay u hoggaansan yihiin dhammaan sharciyada kale ee federaalka, gobolka iyo degaanka ee ku saabsan xuquuqda gaarka ah. La tasho qareen haddii aad hayso su'aalo ku saabsan xuquuqahani.

VIII. <u>WAX KA BEDDELKA OGEYSIINTA ASTURNAANTA</u>.

Siyaadaha lagaga hadlay Ogeysiintani Asturnaanta ama Ammaanka, waxaa dhici karta in wax laga beddeli karo muddo marka la joogo iyada oo wax ka beddelkaasina uu saameyn doono macluumaadka la helay ka hor taariikhda isbeddelka. Dhammaan wax ka beddelka lagu sameeyo Ogeysiinta Asturnaanta ama Ammaanka waa in uu waafaqsan yahay shuruudaha heerarka federaalka ee ilaaliya asturnaanta macaamiisha ee haga hirgelinta iyo hawlgalka CSS.

IX. <u>WEBSITE-KA</u>

Waxaanu nuqulka Ogeysiintani Asturnaanta iyo Ammaanka ku haynaa website-kayaga: [URLs]

X. <u>MACLUUMAADKA MEESHA LA ISKALA SOO XIRIIRAYO</u>

Isticmaal macluumaadka la iskala soo xiriirayo ee hoosta ku qoran si aad u weydiiso su'aalo ku saabsan Ogeysiintani, codso macluumaad dheeraad ah, ama gudbi cabasho.

[Clackamas contact information]

[Multnomah contact information]

[Washington contact information]

– –

Revision History

| Date of Update | Person Making Update | Description |
|---|---|---|
| 04/06/23 | M. Lamb<br>S. Richard | - Added Comp Site-specific language for victim services providers |
| 12/28/22 | S. Richard | - Replaced "...*patient* matching..." with "...*client* matching...". |

| | | |
|---|---|---|
| | | - Replaced "...maintenance of *consumer or patient* health records." with "...maintenance of *client* records."<br>- Edited "...analysis, oversight or management functions." to "...analysis, *reporting*, oversight or management functions."<br>- Replaced "...for purposes unrelated to providing services to individuals…" with "...for research or evaluation purposes …"<br>- Replaced "...In the information systems we use for CSS, we…" with "In the information systems we use, we…" |